IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 30 Nofeenber L. 3 r 11

***FAAFINTA BIL SOO BAXA*** **جريدة شهرية**

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA :** waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA :** Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafii ska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

AMARKA MADAXWEYNAHA J D S

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS, L. 8ee 4 Nof. 1980, Beekhaaminta Kharajka iyo Xannaanaynta Hantida Qaranka.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 122 ee 25 Okt. 1980, Dallacaad Saraakiil.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 123 ee 28 Okt. 1980, Oggolaansho Ruqso Sarkaal.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 124 ee 29Okt. 1980, Dalcaad.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 125 ee 29 Okt. 1980, Dallacaad Sarkaal.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 126 ee 4 Nof. 1980, Dib u celin iyo Dallacaad.

Madbacadda Qaranka

QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GO/LKA MUDUG,5.10.80
Lumid Jeeg War. L. 180669 L. 671

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.11.80.
Lumid Buug Kayd L.14875 L. 672

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 29.10.80,
Lumid Buug Kayd L. 15380 L.673

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.10.80,
Lumid Buug Kayd L. 12337 L. 674

MAXKAMADDA G. J. HOOSE, 8.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 6073 L. 675

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 13913 L. 676

MAXKAMADDA G. BANAADIR. 11.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 6062 L. 677

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 17544 L. 678

MAXKAMADDA G. BANAADIR. 15.11.80.
Lumid Buug Kayd L. 3752 L. 679

MAXKAMADDA G. BANAADIR. 16.11.80.
Lumid Buug Kayd L. 10789 L. 680

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 7146 L. 681

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 240352 L. 682

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.11.80.
Lumid Buug Kayd L. 3961/4 L. 683

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 18.883 L. 684

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.11.80,
Lumid Lix Saami L. 204 ah 209 L. 685

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.11.80,
Lumid Laba Saami L. 146 iyo 147 L.686

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.11.80,
Lumid Saamiyaasha L. 15 L. 687

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.11.80,
Lumid Buug Kayd L. 10951 L. 688

AMARKA MADAXWEYNAHA JDS, lamb. 8 ee 4ta Nofenber 1980 Beekhaaminta Kharajka Dawladda

Xeerka Madaxweynaha JDS lamb..... taariikh....... Beekhaaminta Kharajka iyo xan/neynta han. Qaranka

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qodobka 82 iyo 83ee Dastuurka

MARKUU ARKAY : Xeerka Madaxweynaha JDS lamb. 1 ee 21ka Oktoobar 1980, (Ku dhawaaqidda xaaladda xukunka degdegga ah);

MARKUU ARKAY : In meelaha sida ba'an looga weeciyey hannaanka qumman ee habka qarannimo ay yihiin xilkasnimo iyo dareen la'aanta loo maamulo hantida Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY : dhibaatada ee Dalka ku jirta oo uu la wadaago Adduunweynaha oo dhan guud ahaan, gaar ahaan ay khasbeen duruufo gaar ah oo Ummadda Soomaaliyeed la baday;

MARKUU ARKAY : in ay lagama maarmaan tahay in la qaado tallaabada ku habboon beekhaaminta kharajka iyo xannaaneynta hantida Qaranka;

ISAGOO CUSKANAYA : awoodda lagu siiyey qodobka 83aad ee Dastuurka;

ISAGOO DHEGEYSTAY : Talada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

1) Waxaa la go'aamiyey in la beekhaamiyo kharajka Dawladda.
2) Beekhaamintu waxay ku imaaneysaa:

a) in la joojiyo gebi ahaan kharajka micne la'aanta ah ee aan loo baahneyn;

b) in la yareeyo kuwa aan lagama maarmaanka ahayn;

t) Kharajka la galaayo inuu noqdo mid loo qabo baahi, macnanna leh;

j) in aragti dhaqaale oo adag lagu maamulo guud ahaan kharaj kasta oo Qaranka ama Hay'adihiisa gelayaan;

x) in xannaaneyn iyo gacan ku hayn masul ah loo yeesho qalabka wax soo saarka kuwa adeegga, kuwa xafiisyada iyo qalab kasta ee Hay'aduhu leeyihiin si loo dhimo kharajka dayactirka.

QODOBKA 2AAD

1) Laga billaabo maanta oo taariikhdu tahay 4ta Noofenbar 1980, waxaa laga mamnuucay Hay' adaha Qaranka oo idil in ay iibsadaan baabuur yaryar.

2) Wax alla wixii gorgortan ama wada hadallo ah, ama dhammaystirid beec tillaabooyinkiisii hore la qaaday oo aan weli guntamin lana xiriira iibsad baabuur yaryar, waa wax kama jiraan.

Qodobka 3aad

1) Baabuur yar waxaa shaqo awgeed loo siin karaa Wasiir, Wasiir ku xigeen, Agaasime guud, Maareeye Guud iyo jagooyinka u dhigma ee Hay'adaha kale ee Qaranka.

2) Madaxda ku cad qaybta hore ee Qodobkan waxay baabuurtaas ugu isticmaali karaan danta xilalka ay hayaan keliya, waxaana reebban in baabuurta ay wadaani cid ka baxsan shufeerada loo dhiibay.

3) Daadgureynta Shaqaalaha kale waxaa loo habeynayaa gaadiid wadajir loo raaco (basas, iwm).

QODOBKA 4AAD

1) Ku xadgudubka Qod.2aad qaybtiisa 1aad ee xeerkan, waxaa loo aqoonsanayaa Xatooyo

xoolo dadweyne oo ku dhacday u weecin hanti dawladeed weji aan loogu talo gelin, qofkii ay ku caddaatana waxaa lala tiigsanayaa sharciga

2) Ku xadgudubka qodobka kale ee xeerkan, iyadoo hadba la eegayo dabeecadda iyo culeyska falka, waxaa loo aqoonsanayaa dembi, qofkii u gefana waxaa laga qaadayaa tallaabo waafaqsan sharciga.

### Qodobka 5aad

1) Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 4ta Noofeenbar 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

2) Qof kasta waxaa ku waajib ah inuu dhowro xeerkan.

3) Xaqiijinta si habsami u dhaqangelinta xeerkan waxaa si gaar ah loogu xilsaaray Guddiyada G.S.K., Boliiska, NSSTA, iyo dhammaan Ciidammada Nabadgelyada oo idil.

Muqdisho, 4 Nofenbar 1980.

MADAXWEYNAHA JDS,

Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 122 ee
25 Oktoober 1980, Dallacaad Saraakiil

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qodobka 82aad,
ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.72 ee ku saasan dhismaha Ciidanka Baliiska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed ee ku kala qorraa xaashiyaha XOG/A/8/1 ee 15.10.80ka iyo

XOG/GG/239 ee 25.10.80ka.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

Labada Sarkaal ee hoos ku qoran loo dalacsiiyo derejada mid kasta hortiisa ku qoran laga bilaabo 16.10.80ka.

1) L/Xiddigle Cabdi Kaahiye Faarax — Dhamme
2) Xididgle Maxamed Amiin X. Axmed L/Xid/le

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Daw/da.
Muqdisho, 25.10.80ka.

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 7 bogga lamb. 94
Muqdisho, 7 Nofen. 1980

Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 123 ee 28 Okt. 1980, Oggolaansho ruqso Sarkaal.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qodobka 82aad,

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.1972kii oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed kuna qornayd xaashida lamb. CIID/A/12-11 ee 14.10.1980ka iyo arjigii uu soo qortay Sarkaalku kuna lifaaqnaa isla xaashida kor ku qoran ee uu ku codsanayey in shaqada laga sii daayo.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

Xiddigle Maxamed Sheekh Maxamuud Yuusuf waxaa laga Ruqseeyey Ciidanka Boliska Soomaaliyeed laga bilaabo 31.12.1980ka, taariikhdaas oo ah tan uu ku dhammaanayo fasax laba bilood ah oo ka bilaabma 1.11.1980ka.

Qodobka 2aad

In Sarkaalka la siiyo wixii xaq ah ee uu siinayo sharciga.

Qodobka3aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Daw/da.

Muqdisho 29, Oktoober 1980

MAWAXWEYNAHA JDS
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 7 bogga lamb. 93
Muqdisho, 7 Nof. 1980
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 124 ee
29 Okt. 1980, Dallacaad.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qodobka 82aad,

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee23.12.72 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed ee ku qorrayd xaashida XOG/A/8/1 ee 29.10.80ka,

ISAGOO TIXGELIYEY : Sharafnimada ay ku dhinteen iyo Agoonta badan ee ay ka tegeen.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

Labada marxuun ee hoos ku qoran kana tirsanaan jirey Ciidanka Boliska Soomaaliyeed loo dallacsiiyo min hal derejo laga bilaabo taariikhda mid kasta hortiisa ku qoran:

1) Ex. Marxuun X/le Ismaaciil Jaamac Cali L/X/le 1.6.80

2) Ex. Marxuun K.S. 1678 Yuusuf Abokor Cali Xiddigle 1.11.80

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Daw/da.

Muqdisho, 29 Okt. 1980

MAWAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaan lamb. 7 bogga lamb. 92
Muqdisho, 7 Nof. 1980
Hantidhowraha Guud KMG

Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 125 ee 29 Okt. 1980, Dallacaad Sarkaal.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qodobka 82aad,
ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.72 ee ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed ee ku qorrayd xaashida lambar XOG/GG/62 ee 29.10.80ka.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

G/Sare Maxamed Dhaqane Iidle oo ka tirsan Ciidanka Boliska Soomaaliyeed waxaa loo dallacsiiyey derejeda Sarreeye Guuto laga bilaabo 1.11.1980ka.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan geleyaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho, 29.10.80ka.

MAWAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 7 bogga lamb. 89

Muqdisho, 17 Nof. 1980

Hantidhowraha Guud KMG

Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEKNAHA JDS L. 126 ee
4 Nof. 1980 Dib u celin iyo Dal/aad.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS Qodobka 82aad;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.1972kii oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed;

ISAGOO LA TASHADAY : Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

b) Jaalle Cilmi Jaamac Xuseen oo hore looga wareejiyey Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed dib ayaa loogu soo celiyey Ciidanka Boliska laga bilaabo 30.9.1980.

t) Jaalle Cilmi Jaamac Xuseen waxaa loo dallacsiiyey derejada Gaashaanle laga bilaabo 30.9.1980, shaqadiisuna waxay ahaanaysaa xiriir.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhan geleyaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4.11.1980.

MAWAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 7 bogga lamb. 91
Muqdisho, 17 Nof. 1980
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

UJEEDDO : Go'aan Maxkamadeed TR.5.10.80ka Gud/miyaha Maxkamadda Gabolka Mudug ku Qoran;

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran,

MARKUU EEGAY : Qodobka 82,69 D/L 2 taariikhdeeduna tahay 9.9.65 ee lumidda Jeegga wareega lam. 180669 ee 2.7.80 ay ku qorantahay Sh.So.30,000.00 (Soddon kun) ayna samaysay Bankiga Ganacsiga iyo Keydka kuna xusan dacwadda Sare ku magacaaban.

WAXAA LA AMRAYAA

In la cusbooneysiiyo Jeegga —adib markii ay ka soo wareegto muddo 30 (soddon) maalmood maalinta Dekreetada lagu sharciyeeyo faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAANA, la codsanayaa in jeegga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Taliska Horinta Gaaska 4aad, iyadoo la sugayo muddo 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Gaalkacyo, 5.10.80ka

GUDDOOMIYA MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

(Dr. Cumar Colaad Cabdi)

L. 671

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In buugga dhumay oo lambarkiisu ahaa 14875 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 1aad kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 10.841 ay iska lahayd Xadiya Warsame Raage sida ku cad warqadda lamb. 0952 taariikh 29.10.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) buugga Lam.148-75 oo ku qoran magaca Xaddiyo Warsame Raage ayna ku jirto Sh.So. 10.841/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laantalaad u bedesho Xadiyo Warsame Raage Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 672

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 15380, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 1aad kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 8.000/= uu iska lahaa Cumar Axmed Dhuure sida ku cad warqadda lamb. 6895 taariikh 29.10.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 sharciga lam.2 ee 9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Kayd lam.15380 oo qoran magaca Cumar Axmed Dhuure ayna ku jirto Sh.So. 8.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u bedelo Cumar Axmed Dhuure Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib marka ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.10.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 673

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Kayd dhumay oo lambrkiisu ahaa 12337, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, laanta 1aad kuna qornayd Sh.So. 1298/= uu iska lahaa Maxamed Nuur Cali sida ku cad warqadda lamb.——— taariikh 25.10.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortameto) Buug Kayd lamb. 12337. oo ku qoran magaca Maxamed Nuur Cali ayna ku jirto Sh.So. 1298.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka laanta 1aad u bedelo Maxamed Nuur Cali Buug Kayd ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.10.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 674

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

HADDUU ARKAY : ama akhriyey codsiga Mooge Mocallim Iimaan

MARKUU OGAADAY : inay tahay Shaqo Xafiiskiisa ku saabsan;

HADDUU ARKAY : Qodobka 69 Xeer L. 2 ee 9. 9. 1965

WAXAA LA CADDEYNAYAA

Dhumidda Buuga Kaydka L. 6073 kuna qoran lacag dhan 12.010/= (Laba iyo toban kun iyo toban Shs.) uu leeyahay Mooge Mocallim Iimaan inay ka dhuntay,

WAXAA LA AMRAYAA

Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Kismaayo inuu cusbooneysiiyo Buuga Kaydka L. 6073, muddo 15 (Shan iyo toban) Beri gudaheeda, haddaan la helin cid buugaasi sheegta.

Waxaa kaloo la amrayaa in Buugaas cusub la siiyo qofta iska leh ama qof allaale qofkii iyadu ay wakiilato oo ka sita Wakaalad aan Shaki ku jirin.

Kismaayo 8. 11. 1980

GUDDOOMIYAHA

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

L. 675

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 13913. lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xaruunta kuna qornayd lasag dhan Sh.So.7.274. uu iska lahaa Axmed Cabdulle Maxamuud sida ku cad warqadda lamb. 03694 taariikh 11:11:80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xauurta.

HADDUU ARKAY : Qod.69 sharciga lamb.2.9.9.65

### W U X U U  X E E R I Y E Y

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lamb. 13.913. oo ku qoran magaca Axmed Cabdulle Maxamuud ayna ku jirto Sh.So. 7,274/=

### W U X U U  F A S A X A Y

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xaruunta u bedelo Axmed Cabdulle Maxamuud Buug Keyd ee kor kp tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 676

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 6062 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 1aad kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 28.597/= uu iska warlahaa Cabdulle Maxamed Cadde sida ku cad warqadda lamb. ———— taariikh 11.11.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad

HADDUU ARKAY : Qod. 69 sharciga lamb.2 ee 9.9.65

## WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lamb. 6062 oo ku qoran magaca Cabdulle Maxamed Cadde ayna ku jirto Sh.So. 28.597/=

## WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u bedelo Cabdulle Maxamed Cadde Buug Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 677

W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 17544, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xaruunta kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 2562/= uu iska lahaa Ciise Cabdisalaam Sh. Bar. sida ku cad warqadda lamb. 03695. taariikh 10.11.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xaruunta.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lamb. 17544. oo ku qoran magaca Ciise Cabdisalaam Sh. ayna kujirto Sh.So. 2.562/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xaruunta u bedelo Ciise Cabdisalaam Sheekh Barkhadle Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib marka ay ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishotaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.11.80,

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 678

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE

UJEEDDO: DECRETO DI AMOTAMENTE :

HADDUU ARKAY : Dacwadda ku xusan taariikheysan 12.11.80 .

HADDUU ARKAY : Waxay ku saabsantahay iyo warqaddii Bankiga Marka lamb. 003807 ee taariikh 12.11.80:

HADDUU ARKAY : Warqadda Ogeysiiska ee Bankiga Marka lamb. 003807 eesoo9
ga Ganacsiga iyo Keydka ee Marka.

WUXUU OGGOLAADAY : Inay tahay shaqadiisa.
HADDUU ARKAY : Qod. 69 D.L 9.9.65 L. 2 iyo Lumidda Keydka lamb. 3752 kuna qornaa Jaalle Daa'uud Qalinle Faahiye kuna jirto lacag dhan Sh.So. 7.347.=

WUXUU AMRAYAA:

In la sameeyo Buug Keyd oo cusub ee ay ku qorantahay lacagtaas kor ku xusan iyo Jaallaha magaciisa kor ku qoran yahay kadib markii 15 maalmood lagu shaaciyo Decretada tan faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA:

In Buub Cusub oo loo sameyndoono gacanta laga saaro Jaalle Daa'uud Qalinle Faahiye ama qof ka sido Wakaalad sharci ah iyadoo la sugayo 15kaas maalmood oo aan kor ku soo xusnay.

Marka, 15.11.80

GARSOORAHA MAXKAMADDA G. SH/HOOSE
Dr. Axmed Sheekh Cali Nuur

L. 679

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 10789, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, laanta 1aad kuna qornayd lacag dhan Sh.So.3.530/= uu iska lahayd Faadumo Cabdi Maxamuud sida ku cad warqadda lamb. ——— taariikh 15.11.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 sharciga lamb. 2.9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'yo (ammortamento) Buug Keyd lamb. 10789. oo ku qoran magaca Faadumo Cabdi Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 3.530/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u bedelo Faadumo Cabdi Maxamed Buug Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 680

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay lambarkiisuna ahaa 7146, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 1aad kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 1024/= ay iska lahad Iftiin Axmed Jumcaale sida ku cad warqadda lamb. ——— taariikh 17.11.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 sharciga lamb. 2.9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lamb. 1746. oo ku qoran magaca Iftiin Axmed Jumcaale ayna ku jirto Sh.So. 1024/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u bedelo Iftiin Axmed Jumcaale Buug Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 681

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU BUBIYEY : In Jeeg Wareg dhumay oo lambarkiisu ahaa 240352. lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Dhexe kuna qornayd lacag dhan Sh.So.30.000/= uu iska lahaa Aadan Maxamed Ibraahim sida ku cad warqadda lamb. 011407 taariikh———— Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 sharciga lamb. 2.9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg War. lamb. 240352 oo ku qoran magaca Aadan Maxamed Ibraahim

WUXUU FASAXAY

ayna ku jirto Sh.So. 30.000/=

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Dhexe u bedelo Aadan Maxamed Ibraahim Jeeg Wareega ee ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah eeJamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 682

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 3961/4. lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 3aad kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 71.542/= uu iska lahaa Xasan Saalim Cawad sida ku cad warqadda lamb. 1705 taariikh 22.11.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 sharciga lamb. 2, 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lamb. 3961/4. oo ku qoran magaca Xasan Saalim Cawad ayna

ku jirto Sh.So. 71.542/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad. u bedesho Xasan Saalim Cawad Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L.683

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 18.883. lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xaruunta kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 5.000/= uu iska lahaa Khadar Mucaawad Cabdifitaax sida ku cad warqadda lamb. 03776 taariikh 23.11.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xaruunta.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 sharciga lamb.2.9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortameto) Buug Keyd lamb. 18.883. oo ku qoran magaca Khadar Mucaawad Cabdifitaax ayna ku jirto Sh.So. 5.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xaruunta u bedelo Khadar Mucawad Cabdifitaax Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood, maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 684

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

— Qaybta Madaniga —

HADDII LA ARKAY : Codsiga Bogga kale ku qoran:

HADDII LA ARKAY : Warqadda lamb. 010649 taariikh 28.10.80 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, taas oo lagu caddeynayo in ay ka lumeen lix Saami oo kiiba yahay Sh.So. 1000/= oo uu dhiibtay Xaaji Sh. Iikar Axmed taariikhdu markay ahayd 1.9.65 kana soobaxay Shirkadda SEIS e Marka;

HADDII LA ARKAY : Qod. 11(6) Qod. 89 iyo kan xiga Sharciga lamb. 2 ee 9.9.1965.

WAXAA LA XEERIYEY

In la Qiimo tiro lixda Saami ee tirsigoodu yahay 204 ah 209 oo ku magacaaban Xaaji Sh. Iikar Axmed ayna soo saartay Shirkadda SEIS ayna ku qorantahay Sh.So. 1000/= (Kun) kiiba.

WAXAA LA FASAXAY

Bixinta Saahmiyaashaas soddon maalmood ka dib marka lagu daabaco Go'aanka faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya haddii aan is hortaag laga keenin.

WAXAA LA AMRAYAA

— Qaybta Madaniga —

In Go'aanka la gaarsiiyo Shirkadda SEIS ama ciddii kale ee maamulkeeda haysa laguna daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaalieed,.

Muqdisho, 8.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 685

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— Qaybta Madaniga —

HADDII LA ARKAY : Codsiga kor ku qoran iyo cad-daynta ku lifaaqan;

HADDII LA SAMEEYEY : Baarid kooban;

HADDII LA ARKAY : Qod.11 iyo qod.89 sharciga lamb.2 ee 9.9.1965.

WAXAA LA QIIMETIRAY

Labada sahmi oo wata lamb.146 iyo 147, ee ka soo baxday shirkadda ex agip kuna qoran, magaca Abbanuur Abuukar Maxamed kuna qoran tahay Sh.So. 1000 /=(Kun),, Lambarrada azione yaalka waxay kala yihiin: No.2693 iyo No.2694...

WAXAA LOO FASAXAY

Cidda haysa maamulkii Shirkadda ex agip in ay siiso Abbanuur Abuukar Maxamed xuquuqda ku tilmaaman labadaas sahmi kaddib markii 30 maalmood ka soo wareegato faafinta Go'aanka haddii aan wax ishortaag laga keenin.

WAXAA LA AMRAYAA

In Go'aanka la gaarsiiyo cidda haysa maamulka shirkadda ex Agip laguna daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed.

Muqdisho, 11.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 686

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— Qaybta Madaniga —

HADDII LA ARKAY : Codsiga bogga kale ku qoran iyo caddeynta ku lifaaqan;
HADDI LA SAMEEYAY : Baarid kooban;
HADDI LA ARKAY : Qod. 11.89. sharciga lamb.2 ee 9.9.1965,

WAXAA LA QIIMETIRAY

Sahmiyaasha lamb.15 oo ka soo baxay shirkadda SEIS ee Marka kuna qoran magaca Abbanuur Abuukar Maxamed qiimaheeduna yahay Sh.So. 1.000/= kiiba.

WAXAA LOO FASAXAY

Ciddda haysa maamulka shirkadda SEIS ee Marka in ya siiso Abbanuur Abuukar Maxamed xaquuqud Sahmiyaasha kor ku tilmaaman ka dib markii ay ka soo wareegto muddo 30 maalmood faafinta Go'aanka, ee faafinta rasmiga ah, haddii aan laga keenin ishor-

In Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, lana gaarsiiyo maamulka shirkadda SEIS ee Marka.

Muqdisho 11. 11. 1980

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU BUBIYEY : In Buug Keyd dhumay oo lamtaag.

WAXAA LA AMRAYAA

barkiisu ahaa 10951. lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 1aad kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 70.000/= u iska lahaa Cali Xasan Cumar sida ku cad warqadda lamb. ———— taariikh 25.11.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY : Qod.69 sharciga lamb. 2.9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lamb. 10951 oo ku qoran magaca Cali Xasan Cumar ayna ku jirto Sh.So. 70.000/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u bedesho Cali Xasan Cumar Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.11.80

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GO/KA BANAADIR
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDU HUBSADAY : Buug Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 335/7 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Baraawe kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 5.150/= uu iska lahaa Axmed Kediye Maxamed sida ku cad warqadda lam. 00419 taariikh 1.9.80 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Baraawe.

HADDU ARKAY : qod.69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keydka lam. 335/7 oo ku qoran magaca Axmed Kediye Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 5.150/=

WUXUUFASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Baraawe u bedelo Axmed Kediye Maxamed buugga keydka), ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka sii wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 8.9.80

GUDDOOOM. MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
— Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —

L. 689